

# SOO DEGIDDA HÄMEENLINNA MARKII DIBEDDA LAGA YIMAADO

## FASAX DEGANAANSHO AMA DIIWAANGELIN?

**Dadka u dhashey dalalka Waqooyiga** waxay isku soo qori doonaan Xafiiska Diiwaangelinta Deegaanka (*maistraatti*; haddii ay joogi doonaan 6 bilood ama ka badan).

**Dadka u dhashey dalalka Midowga Yurub** waa inay seddax bilood ka dib isku qoraan adeegyada shati-bixinta booliska.

**Dadka aan u dhalanin Midowga Yurub** waxay u baahan yihiin fasaxa deganaanshada. Diiwaangelinta iyo Fasaxyada deganaanshada Hämeenlinna waxaa soo saaro iyo maamulo adeegyada shati-bixinta booliska.

**Mar walba horey u soo qaado baasaboorkaaga ama warqadaada aqoonsiga Midowga Yurub, fasaxa deganaanshada iyo dokumentivadaada kale!**

## 1. HADDII AAD FINLAND DEGAN TAHAY IN KA BADAN 3 BILOOD IYO TAHAY QOF U DHASHEY DALALKA MIDOWGA YURUB (EU)/AAGAHA DHAQAALAH YURUB (EEA) , ISKU SOO QOR ADEEGYADA SHATI-BIXINTA BOOLISKA

### Hattelmalantie 2

Tel. 0295 414 169

Furan yahay Isniin–Jimco 9subaxnimo–4galabnimo (xiran yahay maalin walba 11 duhurnimo–1galabnimo)

Ballamada iyo talo-bixinta telefoonka waxaa la baxshaa Isniin–Jimco 9subaxnimo–11subaxnimo

### Soo buuxi foomamka

- Dalbashada fasaxa deganaanshada muwaadanka Midowga Yurub (kharash ayaa la bixin doonaa)
- Xubinta qoyska qof Midowga Yurub muwaadan ka ah laakiin asaga/ayada aan eheen muwaadanka Midowga Yurub ama dal la mid ah waa inuu codsado kaadhka deganaanshada (kharash ayaa la bixin doonaa)

### Xaqa deganaanshada waxaa la bixin doonaa haddii

- Aad qof u shaqeyso ama iskaa u shaqeysato **ama**
- Aad qabtid lacag kugu filan iyo kaadhka caymiska caafimadka **ama**
- Laguu ogolaadey inaad wax ka barato machad/kulliyad iyo aad qabtid lacag kugu filan **ama**
- Aad xiriir qoys la leedahay qof ku nool Finland.

## 2. ISKU SOO QOR XAFIISKA DIIWAANGELINTA DEEGAANKA

Xafiiska Diiwaangelinta Deegaanka keen warqadaada dhalashada, shahaadada ninkaaxa, furitaanka iyo midka walida (haddii aad mas’uul ka tahay carruur aadan dhalin) oo ku turjuban af Finnish iyo shaabadeysan.

Birger Jaarlinkatu 13

Tel. 0295 539 361

Furan Isniin–Jimco 9subaxnimo–4:15galabnimo

### Soo buuxi foomamka

- Diiwaangelinta muwaadanka ajnabiga
- Ogeysiinta is-beddelka cinwaanka

Diiwaangelinta ka dib, waxaa lagu siin doonaa koodka aqoonsiga shakhsiyadeed (*henkilötunnus*). **Eeg haddii aad xaq u leedahay in lagugu qoro diiwaanka munishiibyada magaalada aad degan tahay (*kotikuntamerkitä*).**

## 3. QOF SHAQEEYO WUXUU MAR WALBA U BAAHAN DOONAA KAADHKA CANSHUURTA OO SOO SAARO XAFIISKA CANSHUURTA

Xafiiska Canshuurta keen koodka aqoonsigaaga shakhsiyadeed oo kuu soo saarey Xafiiska Diiwaangelinta Deegaanka.

Lukiokatu 26

Tel. 020 612 000

Furan Isniin–Jimco 9subaxnimo–4:15galabnimo

### Soo dhammeystir foomka

- Codsiga kaadhka canshuur-goynta (*lähdeverokortti*; haddii aad shaqeyso **ka yar 6 bilood**)
- Codsiga kaadhka canshuurta (*verokortti*; haddii aad shaqeyso **ka badan 6 bilood**)

#### 4. XAFIISKA KELA KA EEG CEYRTA AMA GARGAARKA AAD XAQ U LEEDAHAY DALKA FINLAND

Rauhankatu 1

Tel. 020 692 207 (arrimaha u soo haajirida iyo ka guurida dalka)

Furan Isniin 9subaxnimo–5galabnimo, Talaado–Jimco 9subaxnimo–4galabnimo

#### Soo buuxi foomka Y77

- Codsiga nidaamka daryeelka bulshada ee hoos yimaado deganaanshada dalka Finland.

#### 5. DIIWAANGELINTA XAFIISKA SHAQO-BIXINTA IYO HORUMARINTA DHAQAALHA SI AAD U DALBATO SHAQO AMA WAX-BARASHO

Saaristenkatu 3

Tel. 02950 41441

Furan Isniin 9subaxnimo–3:45galabnimo

[www.te-palvelut.fi](http://www.te-palvelut.fi)

Shaqo-raadiyaha diiwangashan wuxuu xaq u leeyahay adeegyada shaqada iyo macluumaad ku saabsan wax-barashada laga heli karo Finland. Xafiiska wuxuu kuu diri doonaa tababarka midaynta (dhex-gelidda bulshada dalka).

#### 6. BANKIGA KA FUR AKOWNTI

Bankiga horey u soo qaado baasaboorkaaga iyo koodkaaga aqoonsiga shakhsiyadeed. Bankiyada waxaa ka mid ah Nordea, Sampo iyo Osuuspankki.

#### 7. SOO BUUXI CODSIGA LAGU DALBADO GURI

Hämeenlinnan Asunnot Oy

Raatihuoneenkatu 7

Tel. (03) 625 161

VVO

Sibeliuksenkatu 2

Tel. 020 508 4200

#### MACLUUMAADKA AAD KA HELI KARTID INTERNETKA

[www.hameenlinna.fi/Palvelut/Maahanmuutto](http://www.hameenlinna.fi/Palvelut/Maahanmuutto)

[www.infopankki.fi](http://www.infopankki.fi)

## MACLUUMAAD KHUSEEYA ARRIMAHA HIJRADA

#### GOOBTA ADEEGGA KASTEELI

#### MACLUUMAADKA HIJRADA

Raatihuoneenkatu 11

[www.hameenlinna.fi/maahanmuuttoinfo](http://www.hameenlinna.fi/maahanmuuttoinfo)

Tel. puh. 050 304 5472

[maahanmuuttoinfo@hameenlinna.fi](mailto:maahanmuuttoinfo@hameenlinna.fi)

#### ADEEGYADA HIJRADA

(qaxootida, magangalyo-doonka iyo haajirayaasha dalka ku soo laabtey)

Kastelli, Raatihuoneenkatu 11

Furan: Isniin–Khamees 1duhurnimo–3:30galabnimo

Tel. (03) 621 2815

#### QOLKA FADHIGA DAQANAHA KALA DUWAN EE KUMPPANUUSTALO (wax-qabadyo iyo naadiyo u qabto koox dhaqan kala duwan leh)

Kumppanuustalo

Kirjastokatu 1

Tel. 040 869 6492

